

**Ruqsad Bixinta Seattle**

— qayb ka mid ah taxanaha qaybaha badan ee Waaxyaha adeegyada iyo ruqsad bixinta ee Magaalada

**Badqabka Baytariyada Lithium-ion ee loogu talagalay Aaladaha Socodka Shakhsi ahaaneed iyo Aaladaha kale ee Shakhsi ahaaneed**

Noofeembar 2022

Baytariyada lithium-ion waxay bixiyaan il wanaagsan oo koronto nadiif ah waxaana loo isticmaalaa aalado badan sanad walba. Baytariyada lithium-ion waxaa laga helaa taleefanada casriga ah, laabtoobyada, iskuutarada, baaskiilka elektaroonigga ah, sigaarka elektarooniga ah, alaabta carruurto ku ciyaarto, iyo baabuurta korantada. Xaalado naadir ah, baytariyadu way shaqayn waayaan, xaaladan waxay si degdeg ah u sababi kartaa dab. Waaxda Dabka Seattle waxay ka jawaabtaa qiyaastii hal dab todobaadkii oo la xiriira baytariyada Lithium-ion.

Qoraalkan Ogaysiiska ee Kaalmada Macmiilku waxa uu bixiyaa talooyin badqab keh oo ku saabsan iibsashada, isticmaalka iyo kaydinta baytariyada Lithium-ion iyo sidoo kale macluumaadka ku saabsan sida si badqab leh loo tuuro.

**libsashada iyo Icticmaalka Aaladaha**

libsashada iyo adeegso aaladaha ay “lagu daray liistada” baaritaanka shaybaar aqoon u leh. Midan macnaheedu waa in baytarigu uu soo maray baaritaan xoogan oo badqab ahaaneed. Ka raadi “UL-Listed” baytariga.

Kaliya u isticmaal batteriga loogu talagalay aaladda. Ha kala badalin baytariyada.

Geli baytariyada habka saxda ah oo markasya raac tilmaamaha warshada samaysay.

**Jaajar garaynta iyo Kaydinta Aaladaha**

Kaliya isticmaal xariga jaajar garaynta ee la socda aalada. Xariga jaajar garaynta aan kiisa ahayn waxaa laga yaabaa inay sii wado inay ku dalacdo baytariga ilaa heer kulaylka, taasoo keeni karta dab. Ha ka tagin aalada oo ku jirta korontada hal mar si buuxda u jaajar garaysmo.

Ha ku jaajar garaynin aalad barkinta hoosteeda, sariirtaada, ama kursi dushiis. Dab ka kaca goobta aad seexanayso waxay u badan tahay inuu keeno dhaawac ama dhimasho.

Ha ku jaajar garaynin baaskiilkaaga elektarooniga ah ama baytariyada kale qolkaaga jiiifka ama albaabkaaga hortiisa ama goibaha kale ee laga baxo.

Ha kaga tagin baytariyada qoraxda ama baabuurta kulul. Dhig baytariyada qol heerkulkiisu caadi yahay.

Baytariyada dhaawacmay waxay u badan tahay inay shaqayn waayaan mana aha in la isticmaalo.

**Astaamaha Dhibaato**

Baytariyada lithium-ion waxay muujinayaan astaamo u baahan in la beddelo haddii ay kululaadaan, balaartaan, ama ku jiraan korontada jaajar garaynta in ka badan sida caadiga ah. Waxa kale oo laga yaabaa inay yeeshaan ur aan caadi ahayn ama bedelmaan midab ahaan ama ay sameeyaan dhawaaqyo aan caadi ahayn. Jooji isticmaalida baytariga haddii aad ku aragto dhibaatooyinkan oo qaado tilaabooyin aad si badqab leh ugu tuuri lahayd (eeg qaybta hoose). Ha ku tuurin baytariyada Lithium-ion qashinka guriga.

Waxyar kahor inta aan shaqada joojinin, baytarigu wuxuu samayn doonaa dhawaq soo booda kadibna foori markas uu gaaska sii daayo. Haddii aad aragto astaamahan, si dhakhso ah uga fogow baytarigan goob badqab leh, ogeysii dadka kale ee kaa ag dhaw inay ka tagaan, oo isla markaaba wac 9-1-1.

**Dib u warshadaynta si Badqab leh Baytariyadii Duugoobay iyo kuwa Dhaawacmay****Baytariyada Duugoobay**

Weligaa ha ku tuurin baytariyada Lithium-ion qashinka caadiga ah.

Goobaha wareejinta ee Seattle Public Utilities (SPU) waxay dib u warshadayn doonaan baytariyada Lithium-ion oo ay kamid yihiin AAA/AA/C/D, baytariyada badhanka leh, alaabta guriga ee leh baytariyada korontada la galiyo, iyo baytariyada ku jira laabtoobyada, taableetyada, telefoonada, ama xirmooyinka korontada mashiinada wax lagu jaro ee aan xarig lahayn iyo aalado kale. SPU lagama yaabo inay qaadato baytariyada dhaawacmay ama baytariyada waaweyn sida kuwa loogu talagalay baaskiilada elektarooniga ah. <https://atyoursevice.seattle.gov/2021/09/30/dead-batteries-recycle-them-with-spu/>

Call2Recycle waa urur aan macaash doon ahayn kuwaas oo ganacsiyada iibiya alaabada baytarigu ku jiraan u fidin karaan dib u celin kharash la'aan ah. Waxaa ka jira dhawr ikhtiyaar gudaha Seattle, oo ay ku jiraan baytariyada baaskiillada elektaroonigga ah. <https://www.call2recycle.org/locator/>

**Baytariyada Dhaawacmay**

Gooboadaad u yar ayaa qaata baytariyada dhaawacmay. Xiriirka customerservice@call2recycle.org si loo qabanqaabiyo ikhtiyaarada wax ka qabashada gaarka ah.

